Ma jecel yahay in qof idinka mida haduu u soo laabto reerkiisa uu ka halo saddex halaad oo waawayn oo buur buuran?

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Ma jecel yahay in qof idinka mida haduu u soo laabto reerkiisa uu ka halo saddex halaad oo waawayn oo buur buuran?" waxaan niri: haa. wuxuu yiri: (Seddex Aayadood oo midkiin ku akhriyo Salaada ayaa uga kheyr badan seddex halaad oo waaweyn oo buur buuran).

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in Salaada oo lagu akhriyo seddex Aayadood ajarkeedu ka kheyr badan yahay in Qofku Gurigiisa ka helo seddex halaad oo riman oo waaweyn oo buur buuran.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/65053